# SHARCIGA 2005 EE LA XIRIIRA AWOODDA MASKAXDA – KOOBITAAAN

## Hordhac

Sharciga 2005 ee la xiriira Awoodda Maskaxdu (Mental Capacity Act 2005) wuxuu soo bandhigayaa qaab guud oo qaanuunka ku salaysan kaasoo lagu ilaalinayo oo awood lagu siinayo dadka dayacan ee aan iskood wax go'aan ah u gaari karin. Sharcigu wuxuu si cad u muujinayaa qofka go'aan gaari kara, goorta uu go'aan gaari karo, iyo nidaamka uu raacayo. Sharcigu wuxuu dadka u oggolaanayaa inay qorshe u sii samaystaan mararka ay dhici karto inay awooddu ka lunto.

Hagista Sharciga waxaa lagu soo bandhigi doonaa Xeer Dhaqameed (Code of Practice) qaanuunka ku salaysan. Nuskho hordhac ah ayaa la diyaariyey si Baarlamaanka gacan looga siiyo inay sharciga go'aan ka gaaraan, nuskhadaas waxaa laga heli karaa bogga intenetka ee DCA oo ah http://www.dca.gov.uk/menincap/legis.htm (qaybta "Sharciga la xiriira Awoodda Maskaxda iyo dukumiintiyada taageersan").

**Sharciga oo dhan waxaa saldhig u ah shan mabda' oo waawayn oo ku xusan Qaybta 1aad:**

- **Xukumidda awoodda** – qofkasta oo qaan-gaar ah wuxuu xaq u leeyahay inuu iskii go'aan u qaato waana in marka hore lagu xukumaa inuu arrintaas awood u leeyahay haddii aan la xaqiijin wax arrintaas burinaya;

- **Xuquuqda ay dadku u leeyihiin in laga taageero sidii ay iskood go'aan ugu gaari lahaayeen** – ka hor inta aan la go'aamin inaysan dadku kaligood go'aan gaari karin waa in la siiyo tageerooyinka ay u baahan yihiin oo dhan;

- Waa inaan dadka laga qaadin **xaqa ay u leeyihiin inay gaaraan go'aannada loo arki karo inay yihiin kuwo lala yaabo ama caqli-xumo ah**;

- **Maslaxadda dhabta ah** – wax kasta oo loo qabto dadka awooddoodu dhimman tahay ama magacooda lagu sameeyo, waa inay noqdaan kuwo maslaxadooda dhabta ah ka turjumaya; iyo

- Faragelinta ugu yar – wax kasta oo loo qabto ama lagu qabto magaca dadka awooddoodu dhimman tahay waa inay noqdaan kuwo **sida ugu yar u cunoqabataynaya xuquuqdooda iyo xorriyaddooda asaasiga ah.**

## Muxuu Sharcigu qabtaa?

Sharcigu wuxuu xeer hoosaad isugu keenaa hab dhaqameedyadaa ugu fiican ee hadda jira iyo mabaadi'da sharciga guud ee khuseeya dadka awooddooda maskaxeed ay yar tahay iyo kuwa iyagoo wakiil ka ah go'aanno gaara. Nidaamyada hadda jira ee woodaha

joogtada ah ee qareenada (enduring powers of attorney) iyo haystayaasha Maxkamadda Ilaalinta (Court of Protection receivers) ayuu ku baddelayaa nidamyo dib-u-habyn lagu sameeyay oo la casriyeeyay.

**Sharcigu wuxuu ku shaqo leeyahay qiimaynta awoodda qofka iyo falalka daryeeleyaasha dadka aan awoodda lahayn**

- **Qiimaynta awood dhimmanaanta** – Sharcigu wuxuu dejinayaa hal imtixaan oo cad oo lagu qiimeynayo in qofku uusan lahayn awood uu waqti gaar ah go'aan gaar ah ku gaaro iyo in kale. Waa imtixaan "go'aanka gaar u ah" ("decision-specific" test). Qofna "awood-laawe" looguma bixin karo sababo la xiriira xaalado ama baaritaano caafimaad awgood. Qaybta 2aad ee Sharcigu waxay si cad u qeexaysaa in aan awood dhimmanaanta lagu go'aamin karin oo kaliya iyadoo la eegayo da'da, muuqaalka, xaaladda ama hab-dhaqanka qofka ee laga yaabo inay dadka kale u horseeddo inay xukun aan sal lahayn oo awooddooda la xiriirta ku gaaraan.

- **Maslaxadda dhabta ah** – Wax kasta oo loo qabto dadka awooddoodu dhimman tahay ama magacooda lagu sameeyo, waa inay noqdaan kuwo maslaxadooda dhabta ah ka turjumaya. Sharcigu wuxuu ku deeqayaa liis laga fiirsan karo waxyaabaha ay tahay in go'aan gaarayaashu ay tixgeliyaan marka ay go'aaminayaan meesha maslaxadda dhabta ah ee qofku ay ku jirto. Haddii uu rabo qofku wuxuu bayaan qoran ku soo gudbin karaa wixii dareen iyo himilooyin ah ee uu qabo. Taasoo qofka wax go'aaminaya looga baahn yahay inuu tixgelin gaar ah siiyo. Sidoo kale, waxaa iyaguna xaq u leh in lala tashado daryeeleyaasha iyo xubnaha qoyska.

- **Sharciyada la xiriira daryeelka ama daawaynta** – Qaybta 5aad waxay mugdiga ka saaraysaa in marka uu qof daryeel ama daawayn u fidinayo qof awooddiisu ay dhimman tahay uu qofkaasi daryeelka bixin karo isagoo aysan soo gaarayn **masuuliyad** qaanuun. Dulucdu waxay isugu soo biyo shuban doontaa in si haboon awoodda loo qiimeeyay iyo in maslaxadda dhabta ah la raadiyay. sharcigaani wuxuu dabooli doonaa falalka haddii ay qalloocdaan keeni kara xadgudub ama danbi qofka loo geysto gaar ahaan marka ay qofka khasab ku noqoto inuu farageliyo jirka ama hantida qofka uu sida caadiga ah u daryeelayo. Tusaale ahaan, marka qofka irbad lagu durayo ama marka qofka lacagtiisa wax loogu soo gadayo.

- **Xannibaadda/qaadista xorriyadda** – Qaybta 6aad ee Sharcigu waxay xannibaadda ku qeexaysaa in xoog la isticmaalo ama lagu hanjabo in la isticmaalayo marka uu qofka tabarta darani wax diido, iyo xadayn kasta oo lagu soo rogo xorriyadda iyo dhaqdhaqaaqa qofka ama wax ha diido ama yuusan diidine. Xannibaadda waxaa la oggolyahay oo keliya haddii uu qofka adeegsanayaa si la aqbali karo u rumaysan yahay in xannibaaddu lagamamarmaan tahay si qofka awooddiisu dhimman tahay waxyeello looga horistaago, iyo haddii xannibaadda la isticmaalayaa ay u qalanto muuqaalka sare iyo halista waxyeellada.

- Qaybta 6aad (5) waxay qeexaysaa in sharciga qofka xorriyaddiisa ama xorriyaddeeda ka qaadaya marka la eego macnaha Qodobka 5(1) ee Heshiiska Yurub ee Xuquuqda Aadamiga (European Convention on Human Rights) uusan noqon karin sharci ay qaybta 5aad wax xayndaab ama ilaalin ah u fidinayso.

- Wasaaradda Caafimaadka (The Department of Health) iyo Golaha Qaranka ee Wales (National Assembly for Wales) waxay labaduba talo ku-meel-gaar ah ka siiyeen NHSta (Adeegga Caafimaadka ee Qaranka) iyo maamullada degmooyinka (local authorities) waxyaabaha ka dhalanaya xukunkii ay Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga ee Yurub (European Court of Human Rights) ka soo saartay dacwaddii dhexmartay HL v United Kingdom (Ingiriiska) (kiiskii "Bournewood"), inta la sugayo samaynta qorshayaal la xiriira nidaam difaac oo cusub oo lagu ilaalinayo dadka iyagu soo soo gelaya "dhexyaalka Bournewood".

**Sharcigu wuxuu wax ka qabanayaa labo xaaladood oo go'aan gaare gaar ahi uu fal ku dhaqaaqi karo isagoo wakiil ka ah qof awooddiisu dhimman tahay**

- **Awoodda qareenka ee aan dhammaanayn (Lasting powers of attonery – LPAs)** – Sharcigu wuxuu qofka u oggolaanayaa inuu qabsado qareen matala haddii mustaqabalka ay awood la'aani ku soo socoto. sharcigaani wuxuu la mid yahay Awoodda Joogtada ah ee Qareenka (Enduring Power of Attorney) (EPA) ee hadda jira, hase ahaatee Sharcigu wuxuu sidoo kale dadka u oggolaanyaa inay qareenka u fasaxaan inuu gaaro go'aammada la xiriira caafimaadka iyo daryeelka.

- **Wakiillada ay maxkamaddu magacowdo** – Sharcigu wuxuu oggolaanayaa nidaam ay maxkamaddu wakiillo ku magacaabayso kaasoo beddelaya nidaamka hadda jira ee ka kooban masuuliyiin maamula dhaqaalaha dadka awooddoodu dhimman tahay, nidaamkaas oo ka jira Maxkamadda Dhawritaanka (Court of Protection). Wakiilladu waxay awood u haysan doonaan inay go'aan ka gaaraan daryeelka, daawaynta iyo arrimaha dhaqaalaha la xiriira taasoo ay si rasmi ah ugu ogolaatay Maxkamaddu hase ahaatee awood uma lahaan doonaan inay diidaan oggolaanshaha daawaynta qofka nolosha u sii dheereynaysa. Wakiilladaas waxaa la magacaabi karaa oo keliya haddii aysan Maxkamaddu gaari karin qaraar ay mar keliya arrimahaas oo dhan ku xalliso.

**Sharcigu wuxuu samaynayaa labo hay'adoood oo guud oo cusub kuwaasoo lagu taageerayo nidaamka guud ee waxqabadka qaanuunka, labada hay'adoodba waxay wax ka qaban doonaan baahida dadka awooddoodu dhimman tahay**

- **Maxkamad Dhawritaan oo cusub** – Maxkamadda cusubi waxay maamuli doontaa wixii Sharciga la xiriira, iyada ayaana gaari doonta go'aanka kama dambaysta ah ee awoodda la xiriira. Waxay lahaan doontaa nidaam iyada u gaar ah iyo garsoorayaal la magacaabay.

- **Ilaaliye Guud oo cusub** – Ilaaliyaha Guud iyo shaqaalihiisu/shaqaalaheedu waxay noqon doonaan dadka iyagu masuulka ka ah diiwaangelinta Awoodaha LPAyada iyo wakiillada. Waxay la shaqayn doonaan wakiillada ay Maxkamaddu magacowday, waxayna diyaarin doonaan warbixin ay Maxkamadda uga taageerayaan dhanka go'aan gaarista. Sidoo kale waxay la shaqayn doonaan hay'ado kale, oo ay ka mid yihiin booliska iyo adeegyada bulshada, si ay wax uga qabtaan wixii walaac ah oo laga muujiyo habka uu qareenka ama wakiilku u shaqaynayo. Gole Ilaaliye Guud (Public Guardian Board) ah ayaa la magacaabi doonaa si ay baaris xeel-dheer iyo dib u eegisba ugu sameeyaan habka uu Ilaaliyaha Guud hawshiisa/hawsheeda uga soo dhalaalo/sho. Ilaaliyaha Guud waxaa looga baahan doonaa inuu soo saaro Warbixin Sannadle ah (Annual Report) oo ku saabsan sida uu uga soo dhalaalo/sho hawshiisa/hawsheeda.

**Sharciga waxaa kaloo ka mid ah saddex qaybood oo muhiim ah oo lagu ilaalinayo dadka dayacan**

- **Qareenka Awoodda Maskaxda ee Madaxa bannaan (Independent Mental Capacity Advocate – IMCA)** – Qareenka IMCA waa qof loo magacaabay inuu taageero qofka awooddiisu dhimman tahay ee aan haysan qof u hadla. Qareenka IMCA wuxuu qofka ka matalaa wixii ku saasan himilooyinka, dareemmada, caqiidada iyo hiddaha u gaarka ah, isagoo isla markaasna go'aan gaaraha ku baraarujinaya dhammaan arrimaha go'aanka saamayn kara. Isagoo wakiil ka ah qofka awoodda dhimman ayuu Qareenka IMCA, markii loo baahdo, goa'aan gaaraha gaashaanka u daruuri karaa.

- **Go'aammada hore ee daawaynta lagu diido – Xeerar qaanuunka ku salaysan oo si cad loo ilaaliyay** ayaa xaqiijinaya inay dadku sii go'aansan karaan inay daawaynta diidi karaan haddii mustaqbalka soo socda ay awooddooda waayi doonaan. Waxaa Sharciga lagu caddeeyay in go'aanka hore loo qaatay uusan khusayn doonin daawayn kasta oo uu takhtarku u arko mid lagamamarmaan u ah dheeraynta nolosha marka laga reebo inay jiraan nidaamyo adag oo ay tahay in loo haoggansamo. Nidaamyadaasi waa kuwa sheegaya in go'aanka qoraal lagu muujiyo, la saxiixo markhaantina laga ahaado. Taas waxaa dheer, waa in uu jiraa bayaan muujinaya inuu go'aanku sidiisa u taagnaan doono 'xitaa haddii ay naftu halis ku jirto".

- **Xadgudub danbi ah** – Sharcigu wuxuu soo saarayaa xadgudub cusub oo danbi ka dhigaya marka qof awooddiisu dhimman tahay si xun loo xannaaneeyo ama la dayaco. Qofkasa oo lagu helo danbiga noocaas ahina wuxuu halis u yahay in lagu xukumo xabsi ilaa shan sano gaaraya.

**Sharcigu wuxuu kaloo faahfaahinayaa halbeegyo baarista loogu talagalay**

- Baaris ku lug leh, ama la xiriirta, qof awooddiisu dhimman tahay ayaa sharciyan la samayn karaa haddii "hay'ad ku haboon" (sida caadiga ah Guddiga Baarista Anshaxa – Research Ethics Committee) ay oggolaato inay baaristu ammaan tahay, la xiriirto xaaladda qofka iyo inaan natiijo wax-ku-ool ah laga gaarayn haddii lagu sameeyo dadka maskaxdoodu buuxdo. Baaristu waa inay qofka u keenaysaa waxtar ka sarreeya halista ama culayska uga imaanya. Marka dhinac kale laga eego, haddii ay keenayso cilmi saynis cusub waa inay halista ugu yar qofka u geysanaysaa waana in loo fuliyo qaabka ugu yar ee ay xuquuqdiisa u taabanayso ama u soo faragelinayso.

- Waa in lala tashadaa daryeelayaasha ama dadka kale ee la magacaabay waana inay ogolaadaan inuu qofku rabo inuu ka qayb qaato mashruuc baaris ah oo la soo xaqiijiyay. Haddii uu qofku muujiyo calaamado sheegaya inuu diidan yahay ama si uun u mujinaya in uusan rabin inuu mashruuca ka qayb qaato, waa in isla markaaba qofka mashruuca laga saaraa. Xeerarka waqtiyada kala-guurka ah ayaa dabooli doona baarista la bilaabay ka hor inta aan Sharcigu soo bixin, markaas oo uu qofku awood u lahaa inuu wax ogolaado/diido, awooddaasoo markii dambe uu waayay iyadoo mashruucu uusan weli dhammaan.